

Aaga loo qoondeeyey guryaha ee New Holly

Sahanka Mashruuca

Maalgelinta

Kooxda Aagga Guryaha ee SDOT waxay iskaashi la sameeyeen Waaxyaha iyo Barnaamijyada kale si ay ugu helaan lacag dheeraad ah mashaariicda. Iskaashatooyinka soo socda ayaa ka muuqda Aagga loo qoondeeyey Guryaha:

Barnaamijka Codkaaga iyo Doorashadaada:

- \$35,000 oo loogu talagalay barkinnada xawaaraha ee Holly Park Dr. S

Dhismayaasha gaarka ah:

- \$25,000 oo loogu talagalay qurxinta is Goysyada

Waaxda Xaafadda, Sanduuqa isla middhigida Xaafadaha:

- Sawir-gacmeed Dhalinyaradu ku sameeyeen isgoysyada, sawir-gacmeedka dhalinyarada sameeyeen

Barnaamijka Jidka Cagaaran ee Xaafada:

- \$300,000 oo loogu talagalay Waddada Cagaaran iyo/ama Stay Health Street. Nakhshadeynta iyo wacyigelinta mashruucan ayaa la filayaa inay dhacdo 2023 hirgelintuna 2024.

Barnaamijka aasaska ah ee wadooyinka qaybta lugaynta:

- \$50,000 oo loogu talagalay ka dagashada laamiga iyo hagaajinta isgoysyada

Codsiyada Deeqaha:

- \$4M oo loogu talagalay Xidhiidhada Jidka lugaynta ee Chief Sealth
- \$100k oo loogu talagalay hagaajinta isgoysyada qaybta lugaynta ee S Myrtle St.
- \$500,000 ayaa loo codsaday dariiqyada laamiga ee ku xiraya bulshada Jidka lugta ee Chief Sealth.



Iskaashiga

Iyadoo wada shaqaynaya, SDOT iyo Hosted (Healthy Othello Safer Through Environmental Design) waxay ku biireen afar socod oo bulshada ah. Intii socodku socday waxa aanu helnay walaac, arrimo, iyo fikrado ka yimid bulshada. Waxaan dib u eegis ku samaynay ra'yi-celinta bulshada iyadoo shirar isdaba joog ah aan la yeelanay Guddiga Hoggaaminta Aagga Guriga ee New Holly/Othello. Si wadajir ah, waxaan u sameynay mashaariic anago ka jawaabayna tabashooyinka bulshada. Mashruucyadani waxay ka dhasheen qorshaha aagga Guryaha ee New Holly/Othello.

Maalgelinta Aagga Guryaha

Waxaa jira \$200,000 oo loogu talagalay Barnaamijka Aaga Guriga si loogu maalgeliyo mashaariicda soo socota:

1. Hagaajinta shan Isgoys: \$50,000
2. Yaraynta xawaraha baabuurta ee jidka: \$100,000 oo loogu talagalay kurtumada xawaaraha iyo calaamadaynta
3. Kurtumada Xawaaraha: \$50,000 Kurtumada xawaaraha ee 32nd Ave S
4. Nashqada Fikradaha Kaliya
 - a. Isku xidhiidhka Jidka lugta ee Chief Sealth: \$20,000 naqshadaynta fikradda iyo in laga caawiyo SDOT inay codsato deeqaha mustaqbalka
 - b. Hagaajinta Socodka: \$10,000 naqshadaynta fikradda ee S Holly St
 - c. Horumarinta Isgoysyada: \$10,000 naqshadaynta fikradda ee S Morgan St iyo 31st Ave S

Ka samee sahan online ah halkan:

www.seattle.gov/transportation/projects-and-programs/programs/



Su'aalo?

limayl.Neighborhood.Traffic@seattle.gov
Ama wac (206) 684-0353



Seattle
Department of
Transportation

Aaga loo qoonddeeyey guryaha ee New Holly

Khariiddada qoraalka qabyada ah ee aagga Guriga

